





Fritidsfond

Ujeedada Fritidsfondet - oo ah sanduuqa dhaqaalaha firfircoonida wakhtiga firaqada - waxay tahay in la fududeeyo in carruurta iyo dhallinyaradu ka qaybgalaan firfircoonida wakhtiga firaqada ee abaabulan ee muddo socda marka qoysku aanu haysan dhaqaale ku filan oo ay iskood iskaga bixiyaan. Fritidsfondet wuxuu khuseeyaa carruurta iyo dhallinyarada ilaa 18 sano jir ah ee deggan degmada Kristiansand.



Maxaad codsan kartaa in lagaa caawiyo?

- Lacagta xubinnimada iyo qalabka aanay ka maarm in carruurta iyo dhallinyarada ka qaybgalaya firfircoonida wakhtiga firaqada ah ee abaabulan.
- Safaro hal mar ah, firfircooni, koobabka iyo wixii la mid ah ee ka tirsan firfircoonida abaabulan.
- Dhaqaalaha ugu badan ee qofka lagu taageeri karo sanadkiiba waa 10 000 karoon oo loogu talagalay dhammaan kharashyada la xiriira firfircoonida.

Yaa codsan kara?

Waalidiinta, masuuliyiinta ilmaha iyo dadka wakaalad (igmasho) ka haysta waalidka ilmaha. Waxaan kugula talinaynaa inaad akhrisato macluumaadka ku jira boggayaga internetka si aad u ogaato in Fritidsfondet ku khuseeyo adiga iyo in kale.

Xilliga kama dambeyska ah ee codsiga iyo foomka codsiga

Xilliga codsi soo gudbintu ma xadidna, oo xilli kasta sannadka waad soo gudbin kartaa codsi. Kaalmada laga helo Fritidsfondet waxaa si toos ah loo siinayaa ururka/kooxda oo ma loo soo dirayo qoyska.

Ma u baahan tahay in lagaa caawimo soo gudbinta codsiga?

Haddii aad rabto in lagaa caawiyo buuxinta foomka codsiga, waxaad iman kartaa mid ka mid ah goobaha adeegga dadweynaha degmada (innbyggertorg) xilliyada saacadaha shaqada.

Codsiga iyo macluumaad kale waxaad ka heli kartaa:
kristiansand.kommune.no/fritidsfond

